



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**  
**Golaha Shacabka**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**  
**KU SAABSAN**

**NATIIJADA MOOSHINKA GOLAHA SHACABKA KALSOONIDA**  
**KALA LAABTAY GOLAHA WAKIILLADA JUBBOOYINKA**

## GOLAHA SHACABKA:

**Markuu Arkey:** Qodobka 61 (1) (2) ee Dastuurka Federaalka kuna saabsan xilka xubnaha Baarlamaanka Federaalka;


**Markuu Arkey:** Mooshin ku taariikhsan 27.4.2015 oo 43 Xildhibaan ku soo gudbiyeen si waafaqsan Qodobka 41 iyo 48 ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, oo Xusuus-dhowrka Golaha Shacabka soo gaaray 27.4.2015 kuna saabsanaa soojeedin ka dhan ah Baarlamaanka lagaga dhawaaqay Maamulka KMG ah ee Jubbaland;


**Asaga oo ku kulansan:** Kalfadhiga 6-aad Kulankiisa 10aad ee 6<sup>da</sup> Juun 2015 ay goobjoog ahaayeen 142 Xildhibaan oo aan Guddoomiyaha ku jirin una codeenayeen shanta qodob ee hoos ku qoran waxay natiijada codeynta noqotay 132 Oggol, 6 Diiday iyo 4 ka aamustay.

Waxaa halkan hoose ku minguursan qodobbada qaraarka ay soo gudbiyeen soojeediyeyaasha mooshinka:

1. In mudanayaasha Sharafta leh ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ay u codeeyaan, iskuna raacaan in la baabi'yo lagana dhigo waxba kama jiraan, waxa uu Maamulka KMG Jubba ugu yeeray Baarlamaanka, maadaama uusan waafaqsanayn Dastuurka iyo Shuruucda Dalka, halisna gelinaayo nabadda iyo degganaashaha degaankaas.
2. In dowladda Federaalka ay dadka Gobolladaasi si deg deg ah ugu qabato shir dib u heshiisiineed oo rasmi ah, loona dhan yahay.
3. In Dowladda Federaalku dib u heshiisiin ka dib dadka deegaanadaas u abaabusho sidii ay u dhisan lahaayeen Gole Sharcidejin (Baarlamaan) ay u dhan yihiin, sida ku qoran Qodobka 8aad ee Heshiiskii Addis Ababa 27/08/2013.
4. In Xukuumadda Federaalka deg deg ugu hawlgasho sidii gacanta Dawladda loogu soo celin lahaa degaanada ka tirsan Gobolladaas ee weli ku hoos jira xukunka kooxda Nabad-diidka, si ay dadka deegaanku fursad ugu helaan ka qaybgalka dib u dhisidda dalka iyo ka talinta aayahooda.
5. Maadaama muddadii jiritaanka Maamulka KMG ee Jubba ay ku ektahay 26ka Bisha Agoosto 2015, in Dowladda Federaalka ay dadka Gobolladaasi u abaabusho sidii ay u dhisan lahaayeen Maamul Rasmi ah oo ay iyagu

6. Baarlamaanka Federaalka wuxuu go'aamiyey in qodobada Mooshinka sida ay u qoran yihiin loo fuliyo
7. Xafiiska Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka waxaa laga farayaa in uu u howlgalo fulinta iyo wax ka qabadka qodobbada kor ku xusan
8. Si tixraaca idinku fududaado, waxaan halkan ku lifaaqan soojeedinta Mooshinka kor ku xusan oo aad ka heli kartaan nuxurka iyo faahfaahinta mooshinka.

  
**M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"**  
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**



MJ/AM